Sababta oo ah waxa aanu daryeelnaa caafimaadkaaga, waxa aanu wax ka ogaanaa noloshaada. Waxyaabaha aanu ogaano qaar ka mid ah waxay galaan diiwaanka ama faylka caafimaadkaaga, qaar kalena waxay galaan faylka biilasha. Si loo badbaadiyo asturnaantaada, hay'adayadu waxay raacda xeerar la yaqaano oo ku saabsan sida loo maamulo warka caafimaadkaaga. Xeerarkaas iyo xuquuqdaada warka caafimaadka waxa lagu soo koobay boggan. Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta (Ogeysiiska) ee qoraalkan la socda ayaa faahfaahin dheeraad ah ka bixinaya xeerarkaas.

SIDA AANU U ISTICMAALNO UNA BIXINO WARKA CAAFIMAADKAAGA

Warkaaga caafimaadka waxa aanu u isticmaalnaa in aanu ku daweyno, lagu fududeeyo bixinta kharashka adeegyada, loogu bixiyo wax qabadkeena iyo adeegyada, lagugu wargaliyo adeegyo faa'iida leh iyo in laga soo baxo shuruudaha dawladda. Waxa dhici karta in aanu warkan la wadaagno dad lug ku leh daryeelkaaga. Sidoo kale waxa dhici karta in aanu war kooban cid kale la wadaagno si deeq-helid loo sameeyo iyo si loo sameeyo cilmi-baadhis keeni doonto in la hagaajiyo adeegga aad heshid. Waxa kale oo dhici karta in aanu war siino hay'adaha sharci-fulinta iyo xafiisyada dawladda qaarkood haddii uu jiro wax halis ku ah caafimaadka ama ammaanka dadweynaha.

Eeg Ogeysiiska halkan la socda si aad u aragtid liiska ama taxanaha buuxa ee siyaabaha aanu u isticmaalno una bixino warka daryeelka caafimaadka.

XUQUUQDAADA WARKA CAAFIMAADKA

Si buuxda ayaanu u taageeraynaa xaqa aad u leedahay inaad maamushid warkaaga caafimaadka. Halkan hoose waxa ku yaalla koobista xuquuqdaada isla markaana Ogeysiiska halkan la socda ayaa si faahfaahsan u sii sharaxaya xuquuqdaada.

1) Guud ahaan, haddii aad codsatid waad arki kartaa warka caafimaadkaaga.
2) Waxa aad codsan kartaa in xad loo yeello dadka arki kara warka caafimaadkaaga.
3) Waxa aad codsan kartaa in la saxo warka caafimaadkaaga.
4) Waxa aad codsan kartaa liiska sheegaya cidda la siiyay warka caafimaadkaaga qaarkood.
5) Waa in aanu kaa helno oggalaansho qoran oo sheegaya in aanu warka caafimaadka cid kale la wadaagno marka ay jiraan ujeedooyin aan ahayn kuwa lagu soo koobay sanduuqa ku yaala dhinaca bidix ee bogga. Haddii aad na siisid oggalaansho, dib ayaad uga noqon kartaa goortii aad doontid.
6) Waxa kuu banaan inaad su'aalo naga weydiisid dhaqankayaga asturnaanta. Haddii aanad raalli ka ahayn go'aan aanu ka gaadhnay xuquuqdaada, toos ayaad noola soo xidhiidhi kartaa ama waxa aad la xidhiidhi kartaa dawladda federalka, sida lagu sheegay warqadda halkan la socota.

Wakhti kasta waad na soo wici karta ama warqad baad noo soo diri kartaa haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan xuquuqda asturnaanta warkaaga. Fadlan warqad noogu soo dir adreeska ku yaalla bogga 4aad ee qoraalkan. Waxa dhici karta in codsiyada qaarkood uu kaaga yimaado kharash. Goor hore ayaanu kuu soo sheegi doonaa codsiyada kharash kaaga iman karo iyo qiyaastii inta kharashku le'eg yahay.

Waxa aanu ku faraxsan nahay inaad noo dooratay bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga, waxana aanu u guntanay in aanu ilaalino warka caafimaadkaaga.

Allina Health

OGEYSIISKANI WAXA UU SHARAXAYA SIDA LOO ISITCMAALI DOONO LOONA BIXIN DOONO WARKA KUGU SAABSAN IYO SIDA AAD KU HELI KARTID WARKAAS. FADLAN SI TAXADIR LEH U AKHRI.

Waajibaadkayaga Warka Caafimaadka

- Waxa nagu waajib ah in aanu ilaalino asturnaanta warka caafimaadkaaga iyo in aanu ku siino Ogeysiiskan.
- Waxa nagu waajib ah in aanu raacno qodobadayada Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta ee imminka jira.

"War caafimaad" macnihiisu waxa weeye warka ku saabsan xaaladaada caafimaad ee imminka ama berri hore, xaalad, cilad-sheegid, daweyn, saadaalin, ama bixinta kharashka daryeelka caafimaadka. (Waxa jira dhawr ka-reebitaan.)

Yaa Raaci Doona Ogeysiiskan

Ogeysiiskani waxa uu sharaxayaa dhaqanka goobaha caafimaadka ee Allina iyo tan:

- Dhamaan waaxyaha iyo qaybaha daryeelayaasha caafimaadka ee Allina Health.
- Dhamaan dhakhaatiirta tababarka ku jirta, ardayda caafimaadka iyo la-tababareyaasha kale ee xidhiidh la leh Allina Health.
- Dhamaan tabaruceyaasha ay dhici karto inay gargaar ku siiyaan inta aad joogtid Allina Health, iyo
- Dhamaan shaqaalaha joogtada ah, iyo shaqaalaha kale ee Allina Health.

Xuquuqdaada Warka Caafimaadka

Xad-u-yeeliska Isticmaalka ama Bixinta. Ogeysiiskani wuxu sharaxayaa dhawr xad-u-yeelis oo ku saabsan sida aanu u isticmaali karno una bixin karno warka caafimaadkaaga. Waxa aad naga codsan kartaa xad-u-yeelis dheeraad ah oo ku saabsan sida aanu u isticmaalno ama cidda aanu siino warka. Waa inaad codsigaas ka soo dhigtid qoraal.Haddii aad naga codsatid in aan loo dirrin heyada ceymiska(inshuuransigaaga) ee aad adigu qarashka oo dhan bixiso waanu yeeleynaa codsigaaga, . Qasab naguma ah in aannu ogalaano codsiyadaada kale. Haddiise aynu ogalaano, waannu raaci doonnaa xad-u-yeelista marka laga reebo:

- xaalad degdeg ah oo keenaysa in warkaaga loo baahdo si laguu daweeyo
- haddii aad na siisid oggalaansho qoran oo noo fasaxaya in aannu isticmaalno ama bixino warkaaga
- haddii aad go'aan ku gaadhid ama annagu go'aan ku gaadhno in la joojiyo xad-u-yeelista, ama
- sidii kale ee uu sharcigu farayo.

Haddii aad noo diidid in aannu warka siino caymiskaaga (inshuuraniskaaga), waxa lagaaga baahan doonaa inaad sharaxdid sida aad ku bixin doontid kharashka daweyntaada, waxaadna mas'uul ka noqoneysaa in aad la timaadid sidii aad ku bixin lahayd .

Isgaadhsiin Beddel ah. Caadi ahaan, waxa aanu kaala soo xidhiidhi doonaa adreeska iyo lambarka teleefonka aad na siisid. Waxa aad na weydiisan kartaa in aannu kuula soo xidhiidhno siyaabo kale ama goob kale kaala soo xidhiidhno. Waa aanu ogalaan doonnaa codsigaaga haddii uu caqli-gal yahay.

Helista Warka ee Bukaanka. Waxa aad naga codsan kartaa inaad fiirisid ama koobi (nuqul) ka heshid warka caafimaadkaag. Haddii aad naga codsatid nuqul warka caafimaadkaaga ama akhbaartaada kale ee ku jira combuterka,waxa aad heleysaa isagoo combuterka aad ka fiirsan karto marka aad naga codsatid. Waxa loo baahan yahay inaad codsigaaga qoraal ka soo dhigtid.Haddii aad koobiyo na weydiisatid, waxa aanu kugu soo dalici doonaa kharashka sameynta koobiyada, kharashka sameynta koobiyada raajooyinka ama wixii ah sawiro kale, iyo kharashka boosta haddii koobiyada boosta laguugu soo dirayo. Haddii aad codsatid qaab kale oo aanu bixino, waxa aanu kugu soo dalici doonaa qiime caqli-gal ah oo ku salaysan kharashkayaga.

Haddii codsigaaga la diido, waxa aanu kuu soo diri doonaa diidmada oo qoraal ah. Waxa kale oo warqadda diidmada laguugu sheegi doonaa sababta diidmada keentay iyo wixii xuquuq aad leedahay ee ku saabsan dib-u-fiirin lagu sameeyo diidmada.

Ku-daris. Waxa aad naga codsan kartaa in wax laga beddelo warka caafimaadka qaarkii. Waxa loo baahan yahay in codsigaasi noqdo mid qoraal ah. Waa inaad sharaxdid sababta aad u rabtid in warka wax laga beddelo. Haddii aanu ogalaano beddelidda, waxa aanu isku dayi doonaa in la wargaliyo ciddii hore u heshay warka (oo ay ku jiraan dadka aad ku soo sheegtid qoraal) si loogu sheego warka la beddelay. Wixii la beddelay waxa aanu ku soo dari doona warka caafimaadkaaga ee wakhtiga soo socda la bixin doono. Haddii codsigaaga la diido, diidmada oo qoraal ah ayaaanu kuu soo diri doonaa. Warqadda diidmada waxa ku jiri doona sababta diidmada keentay, waxana laguu sheegi doonaa wixii talaabo jawaab-celin ah ee aad qaadi kartid.

Liiska Bixinta. Waxa aad heli kartaa liis uu ku qoran yahay ciddii la siiyay warka caafimaadkaaga – oo leh dhawr ka-reebis – kaasoo annagu aanu bixinay ama cid aanu shuraako nahay bixisay. Liiska kuma jiraan:

- bixin loo sameeyay sababo daweyn, lacag-bixin ama daryeel caafimaad (qodobkan waxa lagu qeexay qaybta soo socota)
- bixin la sameeyay ka hor 14-kii Bisha Afraad, 2003, iyo
- bixino kale hadba sida sharcigu oggalaaday.

Waa inaad codsigaaga ka soo dhigtid qoraal. Haddii aad soo codsatid liiska warka la bixiyay in ka badan hal mar mudo ah 12 bilood, waxa dhici karta in aanu kugu soo dalacno kharash la saaro halkii liis ee dheeraad ah. Codsigaaga waad ka noqon kartaa ama wax baad ka beddeli kartaa si kharashku kaaga yaraado ama u baaba'o.

Ogeysiiska oo ah Koobi Warqad ah. Waxa aad heli kartaa koobi warqad ah oo ah Ogeysiiska dhaqanka Asturnaanta ee imminka jira.

Isticmaalka iyo Bixinta Warka Caafimaadka

Si laguu siiyo daryeelka ugu tayo fiican, waxa aanu u baahan nahay in aanu isticmaalno bixino na warka caafimaadka qaarkii.

Waa aanu ilaalinaa warka caafimaadka mar kasta oo la isticmaalayo ama la bixinayo. Isticmaal iyo bixin kasta waxa aanu sameyn doonaa iyadoo la raacayo dhaqankaya ga asturnaanta iyo sharciga**.** Waxa aanu u isticmaali karnaa una bixin karnaa warka caafimaadka sidan soo socota:

Hawlaha Daweynta, bixinta kharash iyo Daryeelka Caafimaadka.
Waxa aanu warka caafimaadka u isticmaali karnaa una bixin karnaa ulajeedooyinkan:

- daweyn (waxa ku jira la-shaqeynta daryeel-bixiye kale)
- kharash bixinta (sida biilasha ka soo baxa adeegyo la bixiyay), iyo
- hawlahayaga daryeelka caafimaadka. Kuwani waa hawlo aan ahayn daweyn iyo kharash bixin oo noo saamaxaya in aanu shaqadayada qabsano ama bixino adeegyo. Waxa kuwan ku jira qiimeynta tayada iyo hagaajinta, dib-u-fiirinta waxqabadka ama tayada xirfadleyda caafimaadka, iyo bixinta barnaamijyo tababar ah.

Degdeg Caafimaad. Waxa dhici karta in aanu isticmaalo ama bixino warka caafimaadkaaga si laguu caawiyo marka u jiro degdeg caafimaad.

Xusuusinta Ballamaha iyo Beddelka Daweynta. Waxa aanu kuu soo diri karnaa xusuusin ballamo, ama kuu sheegi karnaa daweyn iyo faa'iidooyin caafimaadka la xidhiidha ama adeegyo ay dhici karto inaad gargaar ka heshid.

Diiwaanka Warka Bukaanka. Warkan soo socda waxa aanu siin karnaa qofkii na kaa weydiista ee sheega magacaaga:

- meesha aad ka joogtid cisbitaalka ama goobta
- xaaladda guud
- diinta qofka (waxa la siiyaa kaliya wadaadada). Waxa aad

dooran kartaa in warkaas qaar ka mid ah ama dhamaantiiba aan la bixin. Tusaale ahaan, haddii aanad doonaynin in aanu dadka u sheegno meesha aad joogtid, waa aanu raaci doonaa amarkaaga. (Marmarka qaarkood, sida marka u jiro
degdeg caafimaad, waxa dhici karta in aanaanu helin amarkaaga ilaa inta aad ka awoodaysid inaad nala hadashid.)

Dadka Lug ku Leh Daryeelkaaga. Waxa aanu war caafimaad oo xad leh siin karnaa dadka lug ku leh daryeelkaaga (tusaale ahaan, qof qoyskaaga ka tirsan ama qof lagala xidhiidho wixii degdeg ah) ama si gargaar looga geysto qorsheynta daryeelkaaga. Haddii aanad doonaynin in warkaas la bixiyo, cidna lalama wadaagi doono. Haddii ay haboon tahay, waxa aanu qof kale u ogalaan karnaa inuu kuu soo qaado dawooyinkaaga, alaabta caafimaadka ama raajooyin.

Hay'adaha Samofalka/Deeq-raadinta. Waxa dhici karta in aanu kula soo xidhiidhno ama in hay'adahayaga samofalku kaala soo xidhiidhaan barnaamijyo deeq-raadin iyo munaasabado. Waxa kaliya ee aanu isticmaali doonaa ama bixin doonaa magacaaga, sida laguula soo xidhiidhi karo, warka kale ee dad-. Waxa aanu warkaas siin karnaa shirkadaha naga caawiya barnaamijyadayada.

Cilmi-baadhis. Waxa aanu warka caafimaadkaaga u isticmaali karnaa ama cid kale ula wadaagi karnaa ulajeedooyin ah cilmi-baadhis sida uu ogol yahay sharcigu ama haddii aad oggalaansho bixisay. Waxa aad na weydiisan kartaa sida aad ula xidhiidhi kartid cilmi-baadhe la siiyay warkaaga caafimaadka loona siiyay ujeedooyin cilmi-baadhis iyo taariikhda aanu siinay.

Geeri; Bixinta Xubin Jidh. Qaar ka mid ah warka caafimaadka ee qofka geeriyooday waxa aanu siin karna qofka dad ugu xiga. Waxa kale oo aanu warkaas siin karnaa maamulaha hawlaha duugista (aasidda), baadhaha sabab geeri, sarkaal ka tirsan sharci-fulinta ama hay'ad bixin xubin jidh.

Indho-ku-haynta Caafimaadka Goob Daryeel Caafimaad/Dhaawac/Cudur. Haddii aad u shaqeysid bixiye daryeel caafimaad, waxa dhici karta in aanu warka caafimaad cid la wadaagno sida uu qabo sharciga gobolka iyo federalka:

- iyadoo ulajeedadu tahay hawlaha indho-ku-haynta caafimaadka goob shaqo, ama
- iyadoo ulajeedadu tahay dhawaac ama xanuun la xidhiidha shaqada.

Fulinta Sharciga. Waxa aanu warka caafimaadka qaarkii siin karnaa hay'adaha fulinta sharciga. Waxay taasi dhici karta:

- marka ilmo la waayay, ama
- marka ay dhici karto dambi ka dhacay goobta, ama
- marka uu jiro halis culus oo ku soo fool leh caafimaadka ama amaanka qof ama dad kale.

Goob Xabsi ah. Waxa aanu bixin karnaa warka caafimaad ee maxbuus ama qof kale oo xidhan iyadoo warkaas la siinayo hay'ad sharci-fulin ama goob xabsi ah.

Xumeyn, Dayicid ama Halis-galin. Waxa aanu bixin karna warka caafimaadka iyadoo la siinayo warka maamulka saxda ah marka uu jiro xumeyn suurtogal ah ama dayicid lagu sameeyay ilmo ama waayeel taag-daran. Haddii caafimaadka ama ammaanka qof uu halis culus ku jiro, waxa aanu warka siin karnaa qofka ama hay'ad sharci-fulin.

Xeerka Ha'yadda Cuntada iyo Dawooyinka (Food and Drug Administration) ((FDA). Waxa aanu warka caafimaadka siin karnaa ciddii amar ka haysata Hay'adda Cuntada iyo Dawooyinka (FDA) si loo cabbiro tayada, amaanka iyo waxqabadka alaabtooda.

Maamulka Ciidanka/Nabad-sugidda Qaranka. Waxa aanu siin karnaa warka caafimaadka dadka amar haysta ee ka socda ciidanka Maraykanka, ciidan shisheeye iyo nabad-sugidda Qaranka Maraynka ama adeegyada badbaadinta.

Wixii Halis ku Caafimaadka Dadweynaha. Waxa aanu warka caafimaadka ee adiga kugu saaban u bixin karnaa ulajeedooyin caafimaad dadweyne, sida:

- sheegista iyo joojinta cudurada (sida kaansarta ama tiibayda/tiibisho), dhaawac ama naafanimo
- sheegista dhacdooyinka nolosha sida dhalasho ama geeri
- sheegista dhacdooyin aan fiicnayn ama ilaalin la xidhiidha cuntada, dawooyinka ama dhibaatooyin ka yimi alaabta caafimaadka
- ogeysiinta dadka la ogeysiinayo alaab cilad yeelatay, hagaajinta ama beddelidda alaabooyin ay isticmaalayaan, ama
- wargalinta qof laga yaabo inuu soo gaadhay cudur ama halis u ah inuu ku dhaco ama fidiyo cudur ama xaalad.

Hawlaha Kormeer Caafimaad. Waxa aanu warka caafimaadka siin karnaa dawladda, hay'adaha liisan bixinta, la-xisaabtanka iyo cadeynta marka hawluhu yihiin kuwo uu oggol yahay ama uu rabo sharcigu.

Marka Sharciyo Kale Kalifaan. Waa aanu isticmaali karnaa ama bixin karnaa warka caafimaadka haddii sharciyo kale kalifaan. Tusaale ahaan:

- Waxa aanu warka caafimaadka siin karnaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka ee Maraykanka (U.S. Department of Health and Human Services) marka u jiro baadhitaan.
- Waxa aanu warka caafimaadka bixin karnaa marka la isticmaalayo xeerka xaq-siinta shaqaalaha ama xeerar la mid ah.
- Waxa aanu warka caafimaadka siin karnaa:
  - adeegyada bulshada iyo hay'ado kale ama dadka loo oggol yahay inay helaan warka ku saabsan dhawaacyada qaarkood ama xaaladaha caafimaad qaarkood iyadoo sababtu tahay adeeg bulsho, caafimaad ama fulin sharci
  - waxa la bixin karaa warka qof aan qaangaadh ahayn oo aan xor ahayn ama qof mas'uul laga yahay sharci ahaan marka ay jirto ilmo-ka-soo-saaris lagu talojiro
  - waxa la bixin karaa warka ilmo aan qaangaadh ahayn oo xor ah ama ilmo aan qaangaadh ahayn oo la siinayo adeegyo qarsoodi ah si loo joojiyo halis culus oo ku soo fool leh caafimaadka qof aan qaangaadhka ahayn.

Nidaam Maxkamadeed. Waxa aanu warka caafimaadka bixin karnaa marka la noo keeno amar maxkamadda federalka ka soo baxay, amarro maxkamadeed, amar maxkamad imaansho, ama dukumenti kale oo sharci ah.

Diiwaanadda Caafimaadka iyo Sharciga Gobolka. Caadi ahaan marka adeeg-bixiye liisan leh oo degan Minnesota uu bixinayo diiwaanadda caafimaadka (sida faylasha caafimaadka ama raajooyinka) waxa loo baahan yahay oggolaansho uu saxeexay bukaanku ama wakiil bukaan oo sharciyeysan. Waxa taas ka reeban marka uu ku hayo degdeg caafimaad, adiga oo adeeg- bixiye nala xidhiidhsan ugu tagay dhibka hadda lagaa daaweeyo, iyo bixinta kale ee sharcigu kalifay ama ogalaaday.

Iyadoo Adiga Oggalaansho Lagaa Haysto

Oggalaanshahaaga. Waxa aanu isticmaali karnaa ama bixin karnaa warka caafimaadkaaga kaliya marka lagaa hayo oggalaansho qoran, marka laga reebo sida kor lagu sharaxay. Haddii aad bixisid oggalaasho qoran, dib ayaad uga noqon kartaa wakhtigii aad doontid adiga oo taas qoraal ahaan nagu soo ogeysiinaya. Warqad aad ku soo qori kartid dib-uga-noqoshada oggalaashahaaga ayaad ka heli kartaa goobta Allina Health ee lagaa siiyay adeegyada, ama adiga oo nala soo xidhiidha. Oggalaanshaha aad bixisay waxa uu joogsan doonaa marka aanu helno warqadda aad soo saxeexday ama marka aanu hirgalino codsigaaga.

Su'aalo iyo Cabasho

Haddii aad su'aalo ka qabtid dhaqankayaga asturnaanta, aad u haysatid in lagu xadgudbay xuquuqdaada asturnaanta, anad raalli ka ahayn go'aan laga gaadhay mid aka mid ah xuquuqdaada asturnaanta, waxa aad soo gudbisan kartaa cabasho inta Sarkaalka Asturnaanta ee AllinaHealth ka soo wacdid 612-262-4900 ama inta aad cabasho qoraal ku soo hagaajisid adreeska soo socda:

Allina Health
P.O. Box 43
Minneapolis, MN 55440-0043

Wixii ah su'aalo ku saabsan bixinta warkaaga (ku saabsan kharashka koobiyada ama bixinta diiwaanada kala xidhiidh 612-262-2300. Waxa kale oo aad dacwad qoran u diri kartaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka ee Maraykanka – Xafiiska Xuquuqda Madaniga (U.S. Department of Health and Human Services – Office of Civil Rights (OCR)). Waxa aanu ku siin doonaa adreeska aad ku soo hagaajin kartid cabasho haddii aad na weydiisatid. Fadlan la soco in aan lagu ciqaabi doonin ama aan lagaa aargoosan doonin sababta oo ah waxa aad xereysatay cabasho.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ama walaac ah oo ku saabsan dhaqankayaga asturnaanta iyo gaar ahaan ogeysiiskan, fadlan Maamulka Warka Caafimaadka kala xidhiidh 612-863-3664.

Hay'adaha uu Khuseeyo Ogeysiiskani

Ogeysiiskani waxa uu khuseeyaa dhaqanka asturnaanta ee ay ku dhaqmaan Cisbitaalada iyo Kiliinigyada Allina (Allina Health) ee hoos ku qoran, iyo goobaha ku xidhiidhsan. Goobahaasi waxay ka tirsan yihiin nidaam daryeel caafimaad oo habeysan. Nidaamkayaga caafimaadka gudihiisa waa aanu wadaagi karnaa warka caafimaadka iyadoo sababtu tahay daweyn, lacag-bixin ama hawlo daryeel caafimaad.

Abbott Northwestern Hospital (Cisbitaalka Abbott Northwestern)
Allina Health Clinics (Xarumaha Caafimaadka Allina Health)
Allina Health Emergency Medical Services (Adeegyada Degdegga Caafimaadka ee Allina Health)
Allina Health Home Care Services (Adeegyada Daryeelka Guriga ee Allina Health)
Allina Health Home Health (Caafimaadka Guriga ee Allina Health)
Allina Health Home Oxygen & Medical Equipment (Oksijiinta & Qalabka Caafimaadka ee Guriga ee Allina Health)
Allina Health Hospice & Palliative Care (Daryeelka Khafiifinta & Hoy Daryeel ee Allina Health)
Allina Health Pharmacy (Farmasiga Allina Health)
Allina Health Laboratory (Shaybaadhka Allina Health)
Buffalo Hospital (Cisbitaalka Buffalo)
Cambridge Medical Center (Xarunta Caafimaadka Cambridge)
Courage Kenny Rehabilitation Institute (Machadka Dib-u-hawlgalinta ee Courage Kenny)
District One Hospital (Cisbitaalka District One)
Edina Family Physicians (Dhakhaatiirta Qoyska ee Edina)
John Nasseff Neuroscience Specialty Clinic (Xarunta Takhasuska Cilmiga Maskaxada ee John Nasseff)
Mercy Hospital (Cisbitaalka Mercy)
Metropolitan Heart & Vascular Institute (Machadka Xiddidada & Wadnaha ee Metropolitan)
Minneapolis Heart Institute (Machadka Wadnaha ee Minneapolis)
Minnesota Perinatal Physicians (Dhakhaatiirta Ka-hor-Dhalashada ee Minnesota)
New Ulm Medical Center (Xarunta Caafimaadka ee New Ulm)
Owatonna Hospital (Cisbitaalka Owatonna)
Penny George Institute for Health & Healing (Machadka Caafimaadka & Bogsashada ee Penny George)
Phillips Eye Institute (Machadka Indhaha ee Phillips)
Regina Hospital (Cisbitaalka Regina)
St. Francis Regional Medical Center (Xarunta Caafimaadka ee St. Francis)
Sharpe Dillon Cockson (Sharpe Dillon Cockson)
Southwest Surgical Center, LLC (Xarunta Qalliinka ee Koonfur Bari)
United Heart & Vascular Clinic (Xarunta Mideysan ee Wadnaha & Xiddidada)
Sports and Orthopaedic Specialists (Takhasusleyaasha Isboortiga iyo Lafaha)
United Hospital (Cisbitaalka United)
United OB GYN Associates (Isbahaysiga Umulinta iyo Haweenka ee United)
Unity Hospital (Cisbitaalka Unity)
Virginia Piper Cancer Institute (Machadka Kaansarta ee Virginia Piper)
WestHealth Urgent Care and WestHealth Emergency Department (Daryeelka Dhakhso ah ee WestHealth iyo Waaxda Gargaarka Degdegga ee WestHealth)

River Falls Area Hospital, oo isaguna ka tirsan nidaamka caafimaad ee habeysan, waxa uu isagu isticmaalaa Ogeysiis kale sababta oo ah waxa uu ku yaallaa Wisconsin.

Ogeysiiskani waxa uu hirgalayaa 14-ka Bisha Afraad 2003. Waxa uu jiri doonaa illaa inta aanu ka beddelayno. Waa aanu beddeli karnaa qodobada Ogeysiiskan waxana aanu qodobada cusub ka dhigi doona kuwo lagu dabaqayo dhamaan warka caafimaad ee aanu hayno. Waxa taas ku jira warka caafimaad ee aanu qornay ama helnay ka hor intii aanaanu isbeddel ku sameyn Ogeysiiskayaga. Ogeysiis kasta oo wax laga beddelay waxa la heli doonaa isaga oo warqad ah waxana lagu soo bandhigi doonaa xarumahayaga iyo rugtayada webka. Waxa kale oo aad codsan kartaa in nuqul ama koobi lagaa siiyo Ogeysiiska la naqtiimay ama wax laga beddelay kaasoo gacanta lagaa siin karo ama boosta laguugu soo diri karo.